



Kristiansand
kommune

«Wakhtigii ka dambeeyey kirismaska waxa Noorway lagu arkay in ay yaraadeen dadka iska qaadaya tijaabo, isla markaana dadka iska qaaday tijaabada waxa kor u kacay tirada dadka laga helay fayrasta. Taas oo macnaheedu yahay in hadda werwer laga qabo in faafitaanku kor u soo kacay markale. Si loo xakameeyo faafitaanka isla markaana loo yareeyo faafitaanka cusub, waxa dawladdu go'aamisay in la hirgeliyo talaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee la xoojiyey oo heer qaran ah.

Taas darteed waa in aynu dib u dhigno isu imaanshaha dadka 14 maalmood. Talooyinkan ayaa khuseeya waddanka oo dhan:

- *Iska dhaaf in marti kuugu timaado guriga. Booqashooyinka gaarka ah dib u dhig 14 maalmood. Dadka keligood degan guri waxa soo booqan kara ama ay booqan karaan hal ama labo saaxiib oo joogto ah ama dad kale oo iyagu hal guri wada degan.*
- *Dhammaan hawlaha qorshaysan ee wakhtiyada firaaqada, ciyaaraha/isboortiga, dhaqannada ama diimaha ee lagu qabto gudaha, waxa lagu talinayaa in dib loo dhigo oo laga dhigo wixii ka dambeeya 18-ka janaayo.*
- *Iska dhaaf safarada laga maarmi karo ee ah waddanka gudihiisa ama dibadiisa.*

Halkan ka eeg macluumaad kale:

<https://www.regjeringen.no/no/aktuelt/innforer-flere-nasjonale-smitteverntiltak/id2826466/»>